Baahinta Adeegga Garsoorka iyo Kaalinta uu Ku Leeyahay Xasilinta Dalka

Dr. Ahmed Ali M. Khayre, PhD
JTI Senior Policy and Training Advisor

TUSMO

1. GOGOLDHIG 1

2. HABRAACA DIYAARINTA QORAALKAN 4

3. CADDAALADDA DALALKA COLAADAHA KA SOO KABANAYA 5

4. KAALINTA GARSOORKA EE XASILINTA DALKA 7

5. BAAHINTA ADEEGGA GARSOORKA EE DALKA 10

5.1 GAARSIINTA ADEEGGA GARSOORKA DEEGAANNADA LAGA XOREEYEY AL-SHABAAB 12

5.1.2 GO'AANKA DOWLADDA OO KHUSEEYA HIRGELINTA GARSOOR KU-MEEL GAAR AH GOOBAHA LA XOREEYEY 13

5.1.3 QAABKA LOOGA HIRGELIN KARO GARSOOR KU-MEEL GAAR GOOBAHA LA XOREEYEY 15

6. CAQABADAHA KU GUDBAN BAAHINTA ADEEGGA GARSOORKA GUUD AHAAN IYO SIDA LOOGA GUDBI KARO 19

6.1 CAQABADAHA GAARKA AH EE GOOBAHA LAGALA WAREEGAY ALSHABAAB IYO SIDA LOOGA GUDBI KARO 21

7. GUNAANNAD 23

1. GOGOLDHIG

Soomaaliya oo ah dal ka soo kabsanaya colaado iyo dagaallo daba-dheeraaday, hay'adaha fuliya caddaaladda oo garsoorku ka mid yahay waxa ay ka mid ahaayeen hay'adihii ku burburay colaadaha. Dowladihii dalka ka jiray xurriyaddii ka bacdi, ha ahaato dowladdii rayidka ama tii ciidammada, waxaa ay ku dhaqmi jireen nidaamka garsoorka midaysan. Nidaamka dowliga oo dalka dhagalgalka ka ahaa xilliyadaas waxa uu ahaa mid awooddu ururs an tahay.Sharciyada khuseeya garsoorka oo dalka dhaqangalka ka ahaa waxa ay ku salaysnaayeen garsoor mideysan. [1] Burburkii dowladdii dhexe kahor garsoorku waxa uu ahaa mid baahsan oo gaarsiisan illaa heer degmo dalka oo dhan.

Xilligii dagaallada sokeeye oo ayna jirin dowlad dhexe oo shayeynaysa oo heshiis lagu yahay, dhowr nidaam oo caddaaladeed ayaa dalka qaybihiisa kala duwan ka shaqeynayey sida caddaaladda ka shaqaynaysay maamullada iyo gobollada qaar oo ahayd mid dowli ah, xeerka dhaqanka, maxkmado lagu dhaqmayo shareecada islaamka iyo nidaam khilaaf xallin oo bushada rayidka ama hoggaamiyo kooxeedyada meelaha qaar ka maamulayey isticmaalayeen. Nidaamyadani waxay inta badan ka wada shaqaynayeen isku meel. Mid kastana waxa uu lahaa faa'iidadiisa iyo nusqaantiisa laakiin dhamaantood waxa ay dhaliyeen heer amni iyo xallin khilaaf xilliyadaas oo ahaa kuwo adag.[2] Waxaa muuqatay haddii aan la helin qaab nabdoon oo khilaafka bushada lagu xalliyo in aan xal loo heli karin collaadda, dalkuna gaareyn xasillooni buuxda.

Intii ka dambaysay dib u yagleeliddii dowladdii ku-meel gaarka ahayd oo lagu soo dhisay dalka Jabbuuti sanadkii 2000, waxaa socday isku dayo badan oo lagu hormarinayo nidaamka dowliga ah guud ahaan, gaar ahaanna nidaamka caddaaladda oo garsoorku qaybta ka yahay iyo in la baahiyo adeegga garsoorka.[3] Maaddaama dalka Soomaaliya uu qaatay nidaam federal ah, waxaa

[1] Legislative Decree 12, June 1961, No.3 Organisation of Judiciary; Xeerka Nidaamka Garsoorka, Sharci L.34 ee 22-09-1974; Macluumaad ku saabsan qaabaynta garsoorka iyo isku keenidda sharciyada labada gobol oo midoobay gaar ahaan garsoorka, fiiri: Contini, Paulo, *the Somali Republic: An Experiment in Legal Integration,* (London: Frank Cass and Co., 1969),pp.32-44

[2] Adre Le Sage, Stateless Justice in Somalia: Formal and Informal Rule of Law Initiatives, Centre for Humanitarian Dialogue, July 2005, https://www.files.ethz.ch/isn/20303/Somalia_stateless_justice.pdf.

[3] Falanqeyn guud oo ku saabsan nidaamka caddaaladda Soomaaliya, taariikhdiisa oo kooban iyo caqabadaha ka jira, fiiri, Rebuilding Somalia's Broken Justice System: Fixing the Politics, Policies and Procedures, *Heritage Institute for Policy Studies,* January 2021,

lagama maarmaan ah in dhammaan hay'adaha dowliga ah oo garsoorku ka midka yahay la federaaleeyo. Inta badan Dowlad Goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ahba waxaa weli dhaqan-gal ka ah shuruucdii dowladihii maamulku aruursanaa sameeyeen garsoorkuna ahaa mid mideysan. Dadaallo la sameeyey oo weli socda ayaa jira oo khuseeya dib-u-habaynta garsoorka iyo nidaamka caddaaladda guud ahaan iyo baahinta adeegga garsoorka.

Tusaale ahaan, waxaa heshiis Nidaamka Caddaaladda iyo Asluubta oo Dowlad Goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ku gaareen magaalada Jowhar sanadkii 2018. Heshiiskaas waxaa la isla qaatay in dalku yeesho nidaamka garsoorka isku dhafan. Waxaa la isla gartay muhiimadda in ay lagama maarmaan tahay in la soo saaro shuruuc heer federaal ah oo " habeynaysa ama xukumaysa 'Hannaanka Caddaaladda' iyo Asluubta Soomaaliya, si loo xaqiijiyo isku dhafka 'Bahda Caddaaladda' ee dhamaan dalka Soomaaliya." Dowlad Goboleedyada waxaa la siiyey "madax-bannaani maamul garsoor oo ku saabsan maareynta qaabka caddaaladda." [4] Heshiiskaas waxaa wax ka baddal ku sameysay Xukuumadda Federaalka oo waxaa meesha laga saaray arrimo dhowr ah oo heshiiska ku jirey. Laakiin waxa aan la beddelin in sharci heer Federaal ah ee Nidaamka Garsoorka ay diyaarinayso Dowladda Federaalka Soomaaliya uu xeerin doono qaab-dhismeedka, xudduudaha iyo heerarka awoodaha maxkamadaha dalka oo faahfaahsan ayaa lagu xusay heshiiska.[5] Khilaaf siyaasadeed oo u dhexeeyey qaar ka mid ah Dowlad Goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ah daraadeed laguma guuleysan in laga heshiiyo hannaanka garsoorka dalka iyo qaab-dhismeedkiisa. Heshiis la'aantaas waxa ay saameyn taban ku yeelatay baahinta adeegga garsoorka iyo xesilloonida dalka.

Doorashadii ka dhacday dalka ka bacdi 15 May 2022, saddex kulan oo ay yeesheen Golaha Wadatashiga Qaranka bilihii Sebtembar, Oktobar iyo Disembar 2022 waxaa looga hadlay arrimo badan oo xasaasi ah oo ay kamid tahay

---

https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/01/Justice-Report-Jan-6-1-1.pdf

[4] Heshiiska Siyaasadeed ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya ee lagu Gaaray Magaalo Madaxda Jowhar ee Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, 23-24 Janaayo 2018.

[5] Mowqifka Dowladda Fedraalka Soomaaliya ee ku aaddan Heshiiska ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya, 6 Agoosto 2018.

hannaanka garsoorka ee dalku qaadanayo.[6] Shirkii Golaha Wadatashiga Qaranka oo qabsoomay 25-28 Dismembar 2022, waxaa lagu go'aamiyey in dalku qaato nidaamka garsoorka isku dhafan oo aad ugu dhow mowqifkii ay Xukuumadda Federaalka ahi ka qaadatay heshiiskii Jowhar. Waxaa kulanku ku baaqay in heshiiska qodobbadiisa lagu muujiyo dib-u-eegidda Dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka. Waxaa kale oo war-murtiyeedka ka soo baxay shirka waxaa lagu sheegay in Puntland keliya ayna saxiixin heshiiska Hannaanka Nidaamka Garsoorka. Weli ma cadda sida uu heshiiskaan u hirgeli doono iyo tallaabooyinka la qaadi doono iyo weliba saameynta uu ku yeelan doono baahinta adeegga garsoorka.[7]

Qoraalkan waxaan uga hadli doonnaa baahinta garsoorka iyo kaalinta uu ku leeyahay xasillinta dalka. Qaybtan hordhaca ah ka bacdi, waxaan si kooban u dul istaagi doonnaa habka loo maray daraasaddan. Ka bacdi waxaa la falanqeyn doonaa caddaaladda dalalka colaadda ka soo kabsanaya oo Soomaaliya ka midka tahay. Waxaa ku xigi doona qaybo ka hadlaya baahinta garsoorka guud ahaan iyo gaar ahaan gaarsiinta adeegga garsoorka meelaha lagala wareegay Alshabaab, caqabadaha ku gadaamman baahinta garsoorka iyo habka looga gudbi garo. Ugu dambayn waxaa qolaalka lagu soo gabagabeyn doonaa qeyb gudaannad ah.

2. HABRAACA DIYAARINTA QORAALKAN

Diyaarinta qoraalkan waxaa loo maray in la daraaseeyo qoraallo badan oo ay ku jiraan qawaaniin caalami ah iyo kuwa dalka, warbixinno dowladeed iyo qoraallo daraasad cilmiyeed ah. Daraasaddu waxa ay ku tiirsan tahay dokumiinti aas'aasi ah iyo kuwo aan asal ahayn. Waxa kale oo waraysiyo aan qaabaysnayn lala

[6] Maxamed M. Xasan, Shirka Golaha Wadatashiga Qaran oo laga soo Saaray War Murtiyeed, Radio Muqdisho, 12 Sebtembar 2022, https://radiomuqdisho.so/shirka-golaha-wadatashiga-qaranka-oo-laga-soo-saaray-war-murtiyeed/ ; Shirka Wadatashiga Qaran oo Goordhaw La soo Gabagabeeyey, HiiraanOnline, 31 Oktobar 2022, https://www.hiiraan.com/news/2022/Oct/wararka_maanta31-182752.htm; War-murtiyeed Shirka Golaha Wadatashiga Qaranka , 25-28 Disembar 2022, Muqdisho

[7] War-murtiyeed Shirka Golaha Wadatashiga Qaranka , 25-28 Disembar 2022, Muqdisho

yeeshay dad khubaro ah oo ka tirsan bahda garsoorka iyo qareenno. Buugaag iyo warbixinno kalana waa la daraaseeyey.

3. CADDAALADDA DALALKA COLAADAHA KA SOO KABANAYA

Maadaama caddaalad darro ay inta badan qayb ka aheed sababaha keenay in dagaallo dhacaan ama dal burburo, waxaa muhiim ah in la hirgeliyo sarreynta sharciga, nidaam dowladeed oo caddaalad ku salaysan, garsoor madax-bannaan iyo guud ahaan nidaam caddaaladeed oo dib u habayn wanaagsan lagu sameeyey.[8] Siyaabo kala duwan ayaa loo qeexay sarreynta sharciga, laakiin halkan waxaan qaadanaynaa fasiraadda Qaramada Midoobay oo tibaaxaysa " Sarreynta sharcigu waa mabda' dawladeed oo dhammaan dadka, hay'adaha dowliga ah, kuwa gaarka loo leeyahay, oo ay ku jirto Dawladda lafteedu, uuna qofna sharciga ka sarreyn, lagulana xisaabtamayo shuruucda si guud loo soo saaro, si siman loo fuliyo, loona xukumo, isla markaana waafaqsan xuquuqda aadanaha , xeerarka iyo halbeegyada caalamiga ah."[9]

Hirgelinta sarreynta sharciga iyo dib-u-habayna hay'adaha dowliga gaar ahaan kuwa caddaaladda oo garsoorku ugu horreeyo waxa ay keenaysaa in la abuuro kalsooni bulshadu ku qabto nidaamka dowliga ah. Midda kale, waxa ay sababaysaa in laga fogaado in dalku dib ugu noqdo khilaafkii hubaysnaa haddii sarreynta sharcigu si fiican u hirgasho.[10] Caddeymo ayaa muujinaya in inta badan dalalka dagaallada sokeeye ka soo baxa ay bib ugu noqdaan colaadda iyo khilaafaadka hubaysan. Baaritaan la sameeyey ayaa muujinaya in 103 dal oo colaad ka soo baxay intii u dhaxeysay 1945-2009, waxaa dagaal dib ugu noqday 57% (konton iyo toddoba boqolkiiba), halka ay 43% (afartan iyo saddex boqolkiiba) ay ka badbaadeen dib ugu noqosho colaadeed. [11] Tusaalaha noogu dhow waa

---

[8] Sababaha dhaliyey colaadda Soomaaliya, fiiri Afyare Abdi Elimi and Abdullahi Barise, The Somali Conflict: Root Cause, Obstacles and Peace Building Strategies, *African Security Review*, 15(1),2006, pp.32-54

[9] United Nations and The Rule of Law, What is the Rule of Law? https://www.un.org/ruleoflaw/what-is-the-rule-of-law/

[10] Ahmed Ali M. Khayre,Somalia: Making Human Rights Central to State Building, *Conflict Studies Quarterly, 2017, https://papers.ssrn.com/sol3/papers.cfm?abstract_id=3049237*

[11] Barbara R. Walker, Conflict Relapse and the Sustainability of Post-Conflict Peace, 13 September 2010, http://web.worldbank.org/archive/website01306/web/pdf/wdr%20background%20paper_walter_04dbd.pdf

dalka Itoobiya oo waqti dheer lagu tilmaami jirey waddan u gudbay horumar iyo xasillooni, laakiin ay dib u bilowdeen dagaallo lagu hoobtay oo illaa hadda aan xal rasmi ah loo helin.[12] Sidaas daraadeed waxaa muhiim ah in la qaado tallaabo kasta oo oo looga hortagi karo in dalka dagaallo sokeeye dib ugu noqdo. Qaabka ugu wanaagsan oo looga badbaadi karo in khilaafka hubeysan iyo dagaal sokeeye dib loogu noqdo waa in sarreynta sharciga iyo caddaalad uu hormuud u yahay garsoor madax-bannaan oo hufan la hirgeliyaa, go'aannada ka soo baxana si loo siman yahay oo caddaalad ah loo fuliyaa.

Caddaaladda, nabadda iyo dimoqraadiyadda ma aha ujeeddooyin haddii mid la hirgeliyo in tan kale laga tago ay qasab noqonayso, laakiin waxaa muhiim in saddexdooda qaab isla socod ah loo hirgeliyaa. Ka hirgelinta saddexdoodaba dalalka jilicsan oo colaadda ka soo kabsanaya sida Soomaaliya waxay u baahan tahay qorshayn istaraatiijiyadeed, isdhexgelin iyo isku dhexwad taxaddar leh iyo in si macquul ah loo kala hormariyo. Hababka diiradda saaraya kaliya hal ama mid kale, ama iska indhatiraya bulshada qaybaheeda kala duwan ama dhibbanayaasha, ma noqon doonaan kuwo waxtar leh.[13]

Dalalka colaadaha ka soo kabsanaya waxaa kale oo muhiim in lala xaalo tacaddiyadii dalka ka dhacay oo go'aan laga gaaro sida laga yeelayo, si ay caddaalad u helaan dadka tacaddiyada soo gaareen, dalkuna uga gudbo wajigaas colaadda. Dalka Soomaaliya dagaallo sokeeyo ayaa ka dhacayey muddo ka badan afartan sano, illaa haddana lagama wada hadlin la ismana warsan. Tacaddiyadaas iyo dagaalladaas sokeeye waxaa ku nafwaayey tobonnaan kun oo qof haddii ayna boqollaal kun ahayn, malaayiinna waa ku bara kaceen kuna hanti beeeleen. La xaalid la'aanta tacaddiyadaas dhacay waxa ay keentaa in bulshada qaybaheeda kala duwan oo dhibaatadu ka dhex dhacday kuna kala nool qaybaha kala duwan ee dalka ay koox kasta hay'sato run u gaar ah iyo fikir ay ka qabaan wixii dhacay, kaas oo laga yaabo in uuna xaqiiqada ku salaysnayn. Haddii aan xal loo helin tacaddiyada iyo dhibaatooyinka dhacay, waxaa adkaanaysa in la helo kalsooni bulshadu ku qabto dowladda oo mar kasta

[12] Declan Walsh and Abdilatif Dahir, Why is Ethioipia at War with Itself?, New York Times, 16 March 2022, https://www.nytimes.com/article/ethiopia-tigray-conflict-explained.html
[13] UN Security Council, The Rule of Law and Transitional Justice in Conflict and Post-Conflict Societies, Report of the Secretary-General, S/2004/606, 23 August 2004, https://www.un.org/ruleoflaw/blog/document/the-rule-of-law-and-transitional-justice-in-conflict-and-post-conflict-societies-report-of-the-secretary-general/

qofka jagada u sarreeyo haya loo arkayo qof wakiil u ah qabiil qabiilooyinka ka mid ah. Arrimihii qabiilooyinka kala tirsanayeenna waxa ay saameyn ku yeeshaan nidaamka dowliga ah. Haddii aan sanadkii hore wixii dhacay la iska warsan, waxaa qofka markaas xadgudubka samaynaya u sahlan inuu dareemo in aan waxba loo raacan doonin. Tacaddiyada waqti dheer ayey dhacayeen laakiin waxaa ku jira kuwii sanadyadii la soo dhaafay dhacay. Tusaale, dhulalka laga xoreeyey Al-shabaab waxaa ka dhacay tacaddiyo badan intii ay joogeen oo ay ku lug lahaayeen dad deegaanka ah.

Waxaa muhiim ah in laga wada hadlo tacaddiyadii dhacay, guddi madax bannaan loo saaro oo go'aan laga gaaro qaabka ugu habboon oo loola dhaqmi karo. Guddiga madaxa bannaan waa in uu ugu yaraan diiwaangeliyaa wixii dhacay si dhammaystiran si ugu yaraan loo helo runta wixii dhacay. Marka la helo xaqiiqada wixii dhacay waxaa sahlan in go'aan la qaato oo lagu heshiiyo sida ugu wanaagsan oo laga yeeli karo si boggaas xanuunka badan loo soo xiro.[14]

Go'aan kasta oo la gaaro garsoorku waxa ka yahay lafdhabar oo waxaa loo baahan yahay garsoor madax-bannaan oo caddaaladda hirgelya. Laakiin waxaa muhiim ah in si nabad buuxda loo helo caddaalad la helaa. Caddaaladna lama heli karo iyada oo aan garsoor hufan oo madax-bannaan la helin. Baahinta garsoorka iyo gaarsiinta deegaan kasta waxa ay qayb ka qadanaysaa helidda caddaaladda iyo hirgelinta sarreynta sharciga. Garsoorka la baahiyo oo qof kasta awoodo , helina karo waxa ay ka hortageysaa in khilaafka bulshada dhexdeeda ah uu weynaado, oo keeno gacan ka hadal khatar ku noqon kara nafka, maalka dadka iyo xasilloonida dalka.[15] Qayta xigta waxaan ku lafaguri doonnaa kaalinta garsoorku ka qaadan karo xasillinta dalka.

4. KAALINTA GARSOORKA EE XASILINTA DALKA

Garsoorku kaalin muhiim ah ayuu ku leeyahay xasilloonida dalka sababta oo ah caddaalad in la helo ayaa fure u ah in xasillooni amni, dhaqaale iyo mid bulsho

[14] Faahfaahin ku saabsan sida caddaaladda ku-meel-gaarka ah looga hirgelin karo Soomaaliya, caqabadaha ku gadaamman, fiiri , Ahmed Ali M. Khayre, Politics of Justice, Human Rights and Reconciliation in the Collapsed State of Somalia, Amsterdam Law Forum, Vol.8:1, 2016.
[15] Waraysi xubin sare oo garsoorka ka tirsan, Disembar 2022(Muqdisho)

timaaddo. Haddii bulshadu waxa ay isku haysato ama tabanayaan xal nabdoon loo helo khilaafka waa yaraanayaa. Waxaa huhiim ah in si caddaalad ah loo qaybsado dhaqaalaha, shaqooyinka iyo wax kasta oo dadka ka dhexeeya lana ilaaliyo xuquuqda muwaadiniinta. Haddii lagu xadgudbo xuquuqda muwaadinka ama khilaaf kale yimaado, garsoorka ayaa la rabaa in uu si dhex-dhexaadnimo, caddaalad iyo hufnaan ku dheehan tahay uga garnaqo. Garsoorku kaalinta kale oo muhiimka ah oo uu qaato oo xasilinta dalka salka u ah waa xakameynta awoodda dowladda iyo hubinta sarreynta sharciga.[16] Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020-2024 waxa uu aqoonsaday xiriirka u dhaxeeya hirgelinta sarreynta sharciga ,nabadgelyada iyo xasilnaanta dalka. Qorshaha Qaran waxa uu xusayaa in sarraynta sharcigu qayb weyn ka yahay "qaab-dhismeedka ilaalinta amniga, kaas oo kana mid ah shuruudaha dhimista faqriga iyo kobaca dhaqaalaha. Xoojinta nidaamyada dalka ee caddaaladda waa in loo tixgeliyaa mudnaanta degdegga ah ee Qorshaha Horumarinta Qaran ee 9aad (NDP-9)."[17]

Hay'adaha garsoorka waxa ay bulshada u qabtaan howl muhiim ah oo ah in qaab nabdoon lagu xallinayo khilaafaadka iyo iska-horimaadyada waxa ayna hubiyaan isticmaalka awoodda dowliga ah. Nabadda , amniga iyo xasilloonida waa ka xeel-dheer yihiin xabadda oo joogsata iyo maqnaashada rabshada hubaysan ama dagaallada. Nabadda iyo xasilloonida waxaa loo kala saaraa mid togan iyo mid taban. Haddii aan hay'adaha dowladdu si hufan u shaqaynayn oo garsoorku uuna ahayn mid madax-bannaan oo xallin kara khilaafaadka, ayna si fiican u hirgelin sarreynta sharciga, nabadda jirta waxa ay noqonaysaa mid taban. Marka la rabo in dal ay ka hana qaaddo nabad togan waxaa muhiim ah in hay'adaha dowladda la xoogeeyo, kala saaridda laamaha dowladdu shaqeeyo, sarreynta sharcigu hirgasho, garsoorkuna madax-bannaanyahay, awoodna u leeyahay in uu si nabdoon u xalliyo khilaafaadka bulshada iyo hay'adaha.

Nabad togan waxaa lagu qeexaa nabad waarta oo ku dhisan maalgashi waara oo lagu horumarinayo dhaqaalaha iyo hay'adaha iyo sidoo kale hab-dhaqannada bulshada ee kobciya nabadda. Waxaa loo isticmaali karaa in lagu qiyaaso adkeysiga bulshada, ama awoodda ay u leedahay in ay u gagsadaan

[16] Waraysi xubin sare oo garsoorka ka tirsan, December 2022(mUqdisho).
[17] Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad 2020-2024, Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga, 6 March 2020, https://mop.gov.so/national-development-plan/

dhibaatooyinka, khilaafyada kala duwan oo aan ku dhicin ama dib ugu noqon colaad. Halka nabadda taban ay tilmaanto maqnaashaha dagaalka iyo rabshadaha oo ayna bulshadu horumarin dhaqan bulsho oo ku wajahan xasillooni iyo nabad ku wada noolasho.[18]

Waxaa xaqiiqo ah in marka garsoorku helo madax-bannaani shaqsi iyo mid hay'adeed labaddaba oo daacadna u noqdo waajibaadkiisa dastuuriga ah, kadib nabad, maamul wanaag iyo horumar dhaqaale oo waara waa la gaari karaa oo garsoorku kaalin mug leh ku leeyahay.[19] Waa la isku raacsan yahay in dimuqraadiyadda iyo nabadda xiriir ka dhaxeeyo. Laakiin waxaa jira dood ku saabsan xiriirka. Qeyb waxa ay ku doodayaan in dimuqraadiyaddu keento ama sabab u tahay nabadda. Dhinaca kalana waxaa ay sheegayaan in nabaddu sababto ama keento dimuqraadiyadda. Doodo kale oo si kale u sharraxayana waa jiraa.[20] Muhimaddu waxa ay tahay in dalalka dimuqraadiyaddu ka hirgashay oo garsoorku madax-bannaan yahay si hufanna u shaqeeyo xasillooni waarta iyo nabad togan ay ka jirto. Meeshaasna waxaa ka cad kaalinta dowlad wanaagga oo dorsoorka madaxa-bannaan oo hufan hormuudka u yahay ku leeyahay xasilloonida iyo nabadda waarta. Waxaa muhiim ah in adeegga garsoorku gaaro dhammaan bulshada. Qaybta soo socota ee qoraalkan waxaan ku falanqayn doonnaa baahinta adeegga garsoorka iyo sida ugu wanaagsan oo loo baahin karo.

---

[18] Falanqeyn ku saabsan nabadda taban iyo tan togan, fiiri, Positive Peace Report 2020: Analysing the Factors that Sustain Peace, *Institute for Economics and Peace*, April 2021, https://reliefweb.int/report/world/positive-peace-report-2020-analysing-factors-sustain-peace; Patricia M. Shields, Limits of Negative Peace, Faces of Positive Peace, *US Army War College Quarterly*, 43:3,2017, https://press.armywarcollege.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=2868&context=parameters

[19] The Role of Judiciary in Promoting Peace, Good Governance and Sustainable Economic Development, Speech by Chief Justice of Republic of South Africa, Mogoeng Mogoeng, Cotonou, Benin, 10 May 2013, https://www.concourt.org.za/images/phocadownload/justice_mogoeng_mogoeng/Speech-by-the-Chief-Justice-Friday-10-May-2013-Benin-as-at-10-May.pdf

[20] Falaygeyn iyo lafagur baaxad leh oo arrinkan ku saabsan, fiiri, Charles S. Gochman et al., Democracy and Peace, International Security, 21:3, 1997, pp.177-187; Nils Petter Gleditsch and Havard Hegre, Peace and Democracy: Three Levels of Analysis, Journal of Conflict Resolution, 41:2, 1997, pp.283-310.

5. BAAHINTA ADEEGGA GARSOORKA EE DALKA

Baahinta adeegga garsoorka waxaa lagu macneyn karaa in adeegga garsoorka la gaarsiiyo dhammaan dalka oo dhan, taas oo macnaheedu yahay in muwaadiniinta iyo qof kasta oo ku nool deegaan aan adeegga garsoorka ka jirin in ay helaan adeeg garsoor. Baahinta adeegga garsoorka waxa ay ka kooban tahay saddex dhinac. Tan koowaad, waa in la helo qawaaniintii iyo qaabkii loo baahin lahaa si nidaamsan oo sharci ah. Tan labaad, waa in si ficil ahaan ah loo gaarsiiyo adeegga garsoorka dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka sida sharcigu qabo. Tan ugu dambaysa, waa in dadweynuhu awood u yeeshaan ammaan ahaan iyo dhaqaale ahaabna isticmaalka adeegga garsoorka.

Baahinta adeegga garsoorka waxa ka dhalanaya in la xalliyo murannada iyo khilaafaadka bulshada dhexdeeda ah iyada oo loo marayo hay'adaha garsoorka. Baahinta garsoorka waa in ay la socotaa hay'adaha kale oo qaybta ka ah silsiladda caddaaladda sida booliska iyo xabsiyada oo kaalin mug leh qaata ka hor iyo ka bacdi gaaridda go'aan garsoor. Waxaa lagama maarmaan ah marka go'aan garsoor la gaaro fulintii iyo meeshii qofkii ciqaab mutaysta lagu hayn lahaa in ay diyaar yihiin. Maamulka guud oo deegaanka oo la hirgeliyo iyo hay'adaha caddaaladda oo la dhiso waxa ay suurto gelinayaan in garsoorku shaqeeyo. [21]

Sida uu sheegayo Qodbka 50aad , farqadiisa (d) ee Dastuurka KMG ah "Si uu u jiro dareen midnimo qaran, deegaan kasta oo ka mid ah Jamhuuriyaddu Federaalka ah ee Soomaaliya waa inuu helaa adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah." Adeegyada Dastuurku waajibinayo in dhammaan dalka la gaarsiiyo si isku mid ah waxaa ka mid ah adeegga garsoorka. Sidoo kale, Qodbka 34aad, farqada 2aad ee Dastuurka KMG ah ayaa qof kasta oo ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya xaq u siinaysa in uu helo "garsoor madax-bannaan, caaddil ah, aan eex lahayn, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go'aan-gaaris ah u leh."[22] Sidaas daraadeed baahinta adeegga garsoorka waxa ay noqonaysaa waajib dastuuri ah.

Dastuurka KMG ah Qodobka 108 waxa uu qorayaa in garsoorka dalku noqonayo saddex heer oo kala ah Maxkamadda Dastuuriga ah, Maxkamado heer Federaal

[21] Waraysi xubno ka tirsan garsoorka, December 2022(Muqdisho)
[22] Dastuurka Federaalka ee Ku-meel Gaarka ah, 2012, Qodobka 50(d) iyo 34(2)

ah iyo Maxkamado heer Dowlad Goboleed ah. Waxa ay u muuqataa in Dowad Goboleedyada la saaray masuuliyadda baahinta garsoorka iyo gaarsiinta deegaannada ay maamulaan. Hase yeeshee, Qodobka 105, farqada 2aad ee DKG ah waxaa ku cad in qaab-dhismeedka garsoorka dalka uu xeer ka soo saarayo Baarlamaanka Soomaaliya.[23] Marka labada qodob la isla akhriyo, waxaa muuqanaysa in ayna si fiican masuuliyaduhu weli u kala caddeyn, wax badanna ay ku xirnaan doonaan dib-u-eegidda dastuurka iyo wada xaajoodyada la socda.

Baarlamaanku weli xeerkaas ma soo saarin. Inta xeerkaas laga soo saarayo waxaa dalka dhaqangal ka ah Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay 1962.[24] Marka la raaco Xeerka Nidaamka Garsoorka oo dalka dhaqangalka ka ah, garsoorku qaanuun ahaan waa baahsan yahay oo waxa uu gaarsiisan yahay illaa heer degmo. Xeerkan waxa uu sheegayaa in maxkamadaha dagmooyinka ay awood ku leeyihiin deegaanka hoos yimaada dagmada dhammaan.[25] Laakiin deegaanno badan oo dalka kamid ah ma gaarin adeegga garsoorka, taas oo ay keeneen sababbo kala duwan. Tan koowaad, deegaanno inta badan ka tirsan koofurta iyo bartamaha dalka waxaa waqti dheer ka talinayey Al-Shabaab, mana oggoleyn in hay'adaha dowladdu ka howl galaan. Tan labaad, Dowlad Goboleedyada qaar ayaa dhismahoodu weli si fiican u dhameystirmin oo aan ku guulaysan dhismaha hay'adaha caddaaladda iyo baahinta adeegga garsoorka. Tan saddexaad, in aan weli si buuxda loogu guulaysan federaalaynta hay'adaha dowladda oo garsoorku ka mid yahay, oo aan weli wanaagsan maamulka loo daadajin heerarka kala duwan. Waxa kale oo jira, in deegaannada maamulladoodu waqtiga dheer shaqaynayeen in ayna xitaa si buuxda u suurtogelin in adeegga garsoorka la gaarsiiyo deegaannada ay ka taliyaan dhammaantood.

Qaabka ugu habboon oo loo baahin karo adeegga garsoorka waa in laga shaqaysiiyo lagana hirgeliyo maxkamado illaa heer degmo sida ku cad Sharciga

[23] Dastuurka Ku-meel Gaarka ah, 2012, Qodobbada 105,108

[24] Legislative Decree, 12 June 1962, No.3, Organisation of the Judiciary; waxa kale oo jira Xeerka Nidaamka Garsoorka, Sharci L.34 oo soo baxay 22 Sebtambar 1974. Hase yeeshee Qoodbka 31aad ee Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka oo soo baxay 30 Juun 2014 ayaa xeerinaya in la buriyey " sharci kasta oo aan la socon karin Xeerka Nidaamka Garsoorka hadda oo lagu dhaqmo N.2 12.06.1962."

[25] Legislative Decree, 12 June 1962, No.3, Organisation of the Judiciary, Articles 1,2

Nidaamka Garsoorka oo hadda dalka dhaqangalka ka ah. Waxaa kale oo loo baahan yahay in hay'adaha caddaaladda oo garsoorku ka mid yahay la federaaleeyo. Si hay'adaha loo federraaleeyo waxaa muhiim ah in dib-u-eegidda dastuurka lagu xuso qaab-dhismeedka garsoorka iyo awoodaha ay kala yeelanayaan heerarka dowladda. Waxaa kale oo loo baahan yahay in sharciyada khuseeya garsoorka dib-u-eegis lagu sameeyo lana waafajiyo nidaamka dowliga ah ee dalku qaatay. Si arrimahaas kor ku xusan loo taabbageliyo waxaa lagama maarmaan ah in heshiis siyaasadeed ay gaaraan madaxda Dowladda Federaalka iyo Dowlad Gobleedyada oo ku saabsan awood qaybsiga iyo hannaanka caddaaladda iyo asluubta ee dalku qaadanayo. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in aan madaxdu keligood go'aammada masiiriga ah isku koobin ee wadatashi ballaaran oo bulshada qaybaheeda kala duwan la sameeyo si kalsooniga shacabka ee dowladda kor loogu qaado.[26] Qaybta hoose waxaan ku eegaynaa gaarsiinta adeegga garsoorka deegaannada dhowaan laga xoreeyey Alshabaab.

5.1 GAARSIINTA ADEEGGA GARSOORKA DEEGAANNADA LAGA XOREEYEY AL-SHABAAB

Kooxda argagixisada ah ee Al-Shabaab waxa ay waqti dheer ka talinaysay dhul aad u ballaaran oo hoos yimaada dhowr Dowlad Goboleed. Deegaannadaas ay ka talinayeen waqtiga dheer kama jirin, haba yaraatee, wax adeeg dowladeed ah, waxa ayna xireen dhammaan goobaha waxbarashada, caafimaadka iyo goobaha kale oo adeegyada bulshada laga bixiyo. Sidaas daraadeed, dhulka laga xoreeyey Al-shabaab waxaa muhiim ah si dhaqso leh loo gaarsiiyo dhammaan adeegyada dowliga ah oo uu ugu horreeyo adeegga garsoorka. Waxa kooxdaas argagixisada ah waqti dheer dadka ku nool deegaannada ay maamulaan ka dhaadhicinayeen xumaanta hay'adaha dowladda oo ay dacaayado ka fidinayeen. Maadaama aan deegaannada ay maamulayeen laga oggoleyn warbaahinta iyaga ka madax-bannaan waxa ay dadka waqti dheer dhagaha ugu shubayeen dacaayado ka dhan ah nidaamka dowliga oo garsoorku ka midka yahay.[27]

[26] Waraysi xubin sare oo ka tirsan garsoorka, Disembar 2022(Muqdisho)
[27] Alta Grobbelaar, Media and Terrorism in Africa: Al-Shabaab's Evolution from Militant Group to Media Mogul, Insight on Africa,pp.1-16, 2022

In dhammaan goobaha laga xoreeyey Alshabaab laga hirgeliyo maamulka dowliga ah oo garsoorku ugu horeeyo waxa ay qaadanaysaa waqti badan, waxayna u baahan tahay diyaargarow dheer. Waxaa lagama maarmaan ah in xilliga kala guurka adeegga garsoorka laga hirgeliyo deegaannadaas iyada oo la isticmaalayo tallaabooyin ku-meel gaar inta hay'adaha garsoorka si dhammeystiran laga hirgelinayo.

5.1.2 GO'AANKA DOWLADDA OO KHUSEEYA HIRGELINTA GARSOOR KU-MEEL GAAR AH GOOBAHA LA XOREEYEY

Madaxweynaha Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Xasan Sheikh Maxamuud, ayaa qiray muhiimadda gaarsiinta adeegyada uu ka mid yahay kan garsoorka mar uu shirguddoominayey Golaha Wasiirrada, waxa uuna yiri "Wasaaraddaha Xukuumadda oo dhan waa in ay masuuliyad iska saaraan sidii deegannada laga xoreeyey argagixisada looga hirgelin lahaa adeegyada asaasiga ah ee bulshada."[28] Iyada oo laga duulayo tilmaamaha Madaxweynaha, Golaha Wasiirrada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa soo saaray go'aan waafaqsan Qodbka 99aad , farqada (b)oo awood u siinaysa Golaha Wasiirrada "oggolaashaha iyo fulinta xeerarka maamulka si waafaqsan shuruucda". Golaha Wasiirrada : "waxa uu garwaaqsaday in goobaha laga xoreeyey Khawaarijta ay ka jirto , xilliga kala guurka, habacsanaan amni, sidaas darteedna si loo sugo amniga iyo xasilloonida , amarka iyo kala dambaynta , xakamaynta xadgudubyada ciidamada iyo dembi-falayaashu ka geysan karaan goobaha laga xoreeyey Khawaarijta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo fulinta sharciga , waxa uu Golaha Wasiirrdadu soo saaray go'aan lagu xaqiijinayo fulinta shuruucda dalka, xasilloonida iyo amniga , amarka iyo kala dambeynta goobaha la xoreeyey".

Go'aanka Golaha Wasiirrada waxa uu isku xiray la'aanta garsoorka iyo amniga iyo xasilloonida, taas oo muujinayso muhimadda uu garsoorku u leeyahay xasilloonida. Qodobka 10aad ee go'aanka Golaha Wasiirrada soo saaray farqadiida 1aad waxa uu caddeynaysaa in "Maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta ciidamada ayaa leh ikhtisaaska dacwadaha ka dhasha u hoggaansaan la'aanta go'aankan iyo inta

[28] Amina Cali, MW Hassan Shiikh oo Amarro Dul Dhigay Golaha Wasiirrada, SONNA, 6 Oktobar 2022, laga heli karo: https://muqdisho.online/mw-xasan-sheekh-oo-amaro-dul-dhigay-golaha-wasiirada/

goobaha la xoreeyey laga dhisayo hay'adaha garsoorka." Farqada labaad oo isla qodobkaan ayaa tibaaxaysa in "fulinta amarrada ka dhasha go'aankan waxaa u qaabilsan ciidammada amniga Jamhuuriyadda Federaalka."[29] Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ah ayaa soo saaray xeer L.115 oo maxkamadaha ciiddamada iyo xeer-ilaalinta ciidamada siiyey awood ay si ku-meel gaar ah ugu maamulaan dacwadaha ka dhasha fulinta xeerka inta laga hirgelinayo garsoorka rayidka oo la qorsheeyey in muddo sagaashan(90) maalmood gudhood lagu dhiso. Hase yeeshee waxa uu isla xeerku sheegay in dacwadaha madaniga ah ay qaadayaan hay'adaha garsoorka oo deg deg deegaanka looga dhisayo.

Go'aankaan Golaha Wasiirrada su'aallo dhowr ah ayaa ku gadaaman. Tan koowaad, waxa aad moodda in uu laba arrin oo iskhilaafsan soo jeedinayo.Mid waa in uu qirayo in ayna deegaanka ka jirin garsoorka dowladda sidaas daraadeedka maxkamadaha ciidamada awoodda loo siiyey. Tan kale, iyada oo la ogyahay in ayna garsoor shaqaynaya ka jirin deegaanka ayaa misana la xeeriyey in dacwadaha madaniga garsoorka rayidka ah oo deg deg loo hirgelinayo galo. Waxaa is weydiin mudan haddii hay'adaha garsoorka oo loogu talo galay in ay galaan dacwadaha madaniga ah deg deg lagu hirgelin karo, maxaa looga baahan yahay in maxkamadda ciidamada awood la siiyo ay ku qaaddo dacwadaha ciqaabta? Si kastaba ka haatee, go'aanka Golaha Wasiirrada waa mid cillado badan ku gadaaman yihiin. Tan koowaad, go'aankaan waxa uu ka hor imaanayaa dastuurka iyo qawaaniinta dalka .[30] Tan labaad, waqtiga kumeel gaarka ciidanka xal ma noqon karo. Sababtoo ah garsoorkii rayidka ayey wiiqaysaa waana ciidameynaysaa. Tan saddexaad, maxkamadda ciidammada awood ay dhulalkaas ku gaarto ma laha. Waxaa kale oo laga yaabaa in arrinkaanu keeno in dadweynuhu u fasirtaan in garsoorka caadiga ah oo dowladda ayna qaban karin shaqadaan taas oo xoojinaysa borobogaandadii Alshabaabka. Waxaa kale oo xusid mudan in aan garsoorka dalka laga talo gelin arrinkaas ay masuulka ka ahaayeen haba yaraatee.[31]

---

[29] Istiraatiijiyada Sugidda Amniga iyo Kala Dambeynta Goobaha Laga Xoreeyey Khawaarijta, Golaha Wariirrada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, SHGW.00 .11.11.22 oo soo baxay 24 Nofembar 2022; Fiiri sidoo kale Xeera Ra'iisul Wasaare L.115, Go'aan Gole-Ansixinta Istiraatiijiyada Sugidda Amniga iyo Kala Dambeynta Goobaha Laga Xoreeyey Khawaarijta, 24 Nofembar 2022

[30] Dastuurka Federaalka KMG,2012, Qodobbada 34, 105,106 iyo 108; Xeerka Nidaamka Garsoorka, L.3, 12 Juun 1962.

[31] Waraysi xubin sare oo Garsoorka ka tirsan, Disember 2022 (Moqdisho)

5.1.3 QAABKA LOOGA HIRGELIN KARO GARSOOR KU-MEEL GAAR GOOBAHA LA XOREEYEY

Inta laga hirgalinayo hay'adihii garsoorka goobaha laga xoreeyey kooxaha argagixisada ah, taas oo waqti dheer qaadan karta, waxaa muhiim ah in nidaam garsoor oo ku-meel-gaar ah laga hirgeliyo goobahaas. Xilliga kala guurka waxaa ugu habboon in goobahaas laga hirgeliyo garsoor deg deg ah oo ay kaalin weyn ku leeyihiin odayaasha dhaqanka iyo culumada deegannadaas. Laba qaab ayaa garsoor deg deg ah looga hirgelin karaa goobaha la xoreeyey.

1. In degmooyinka la xoreeyey dhammaan degmo kasta loo magacaabo guddoomiyaha maxkamadda degmada iyo xeel-ilaaliyaha degmada oo noqonaya laba qof oo sharci yaqaanno ah waayo aragnimana leh iyada oo lagu kabayo caawiyayaal laga soo xulayo odayaasha dhaqanka iyo culumada deegaanka. Guddoomiyaha maxkamadda degmada iyo xeer-ilaaliyaha magacaabistooda waxaa loo marayaa sida haddaba loo magacaabo. Qodobka 26aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka waxa uu xaaladaha qaar oggolaanayaa in caawiyayaal la isticmaalo sida odayaal dhaqameed iyo culummada diinta. Qaabkaan haddii la raaco si deg deg ah ayaa dhammaan deegaannada la xoreeyey looga hirgelin karaa garsoor ku-meel gaar ah oo si tartiib tartiib ah loo xoojiyo iyada oo aan loo baahan in maxkamadda ciidamada awood ayna lahayn la siiyo. Sida ku cad Qodobka 2aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, maxkamadda degmada oo ka kooban qayb madaniga iyo qaybta ciqaabta waxa xarunteedu noqonaysaa xarunta degmada. Dhowr faa'iido ayaa ku jira qaabkan. Tan koowaad, aas'aaska garsoorka degmada ayuu gogol xaar fiican u noqonayaa maadaama tiirkii koowaad la dhisay. Mar kasta oo garsoore tababbaran la helo waxaa yaraanaya kaalinta odayaasha iyo culumada, waxaana xoogaysanaya garsoorka dowliga ah. Wixii xoojin iyo ballaarin waa lagu kor dhisi karaa maadaama aas'aaskii dhisan yahay. Qaabkaan uma baahna xeer gooni ah oo waxaa la isticmaali karaa qawaaniinta dalka dhaqangalka ka ah. Maxkamadda degmada waxa ay deegaannada hoos taga u aadi kartaa qaab guur guur ah oo hadba meesha looga baahdo ayey tegi kartaa iyada oo mar kasta la isticmaalayo odoyaasha iyo culumada deegaanka oo bulshadu kalsoonida ku qabaan. Sidoo kale, maxkamadda Gobolka waxa ay si guur guur ah oo jadwaleysan u tagi

kartaa degaannada la xoreeyey hadba meeshii looga baahdo si bulshadu u hesho caddaalad deg deg ah.[32]

Waxa ay noola muuqataa marka la tixgeliyo daraasadda iyo dhammaan wareysiyada la qaaday in soo qaabka koowaad uu mudnaanta leeyahay isaga oo waafaqsan qawaaniinta dalka, xoojinayana nidaamka garsoorka dalka.

2. In la dhiso maxkamado bulsho oo ku meel gaar ah oo ay garsoorayaal ka noqonayaan odoyaasha dhaqanka iyo culummada deegaanka iyada oo aan loo baahnayn in garsoorayaal sharci yaqaanno ah lagu kabo. Maxkamadahaan ku-meel gaarka ah samayntooda waxaa loo cuskan karaa Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo Dastuurka KMG ah. Qodobka 32aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka oo Wasiirka Caddaaladda siinaya awood oo ku sameeyo maxkamado, wax ka baddalo kuwii hore. Si yagleelidda maxkamadahan ku-meel gaarka ah loo waafajiyo dastuurka, loona ilaaliyo madax-bannaanida garsoorka qaabkan hoos ku xusan ayaa loo mari karaa dhismahooda. Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka in uu u soo gudbiyo soo jeedin Golaha Wasiirrada oo ay xeer maamul oo waafaqsan Qodobka 99aad farqada (b) oo sheegaya in Golaha Wasiirradu leeyihiin awood ay ku oggolaadaan kuna fuliyaan xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda. Marka ay Golaha Wasiirradu ansixiyaan waxaa wareegto ku soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qaabkaan waa mid aad u sahlan in la hirgeliyo. Tan labaad, haddii la xulo culumada iyo odoyaasha dhaqanka oo bulshada kalsooniga ka haysta waxa ay xoojinaysaa kalsoonida bulshada ee garsoorka.Tan saddexaad, dacaayadihii Alshabaab ayey ka hor imaanaysaa oo ahaa in xeerar kale lagu xukumayo. Tan u dambeysa, kiisas badan oo ay ku jiraan kuwo dacwadooda la qaaday xilligii Al-Shabaab deegaanka xukumayeen ayey geli kartaa. Shaqada maxkamadahan ku-meel gaarka ah waxaa lagu dhexwadayaa wacyi gelin dadweynaha. Midda kale oo muhiimka ahna waxaa weeye in marka la samaynayo maxkamada ku-meel-gaarka ah la xeeriyo in ay qayb ka yihiin nidaamka garsoorka oo go'aannada lagu gaaro

[32] Wareysi qareen ka tirsan Ururka Qareennada Soomaaliyeed, Disember 2022(Muqdisho)

la diiwaan geliyo, ayna furnaato in rafcaan looga qaadan karo maxkamadaha sare ee dalka.[33]

Nidaamka caddaaladda oo ku salaysan xeerka bulshada waxaa horay looga isticmaalay dalka Rwanda si caddaalad loogu helo xasuuqii isir-sifeyska ahaa oo ka dhacay dalka Rwanda oo ay ku dhinteen dad lagu qiyaaso 800 oo kun oo qof. Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay ayaa sameeyey Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada Rwanda oo loogu talo galay in ay qaaddo dadkii isir sifeyska geystay.[34] Waxaa muuqatay in eedaysanayaasha oo aan ka yareyn 130 kun oo qof ay qaadanayso in ka badan boqolaal sano in dadka dhan la maxkamadeeyo haddii la isticmaalo maxkamadda caalamiga ah. Tan labaad, xirfadlayaal iyo dhaqaalaba looma haynin in maxkamado caadi ah la hirgaliyo. Waxaa dowladda Rwanda go'aan ku gaartay in ay isticmaasho nidaam garsoor oo dhaqanka bulshada ku slaysan. Waxaa la hirgeliyey maxkamado loogu magacdaray Gacaca oo macnaheedu yahay 'cowska gaaban' oo ah meesha ay dadka Rwanda khilaafaadkooda ku xalistaan.Waxa ay la mid tahay geedka hoortiisa oo Soomaalidu khilaafkooda iyo arrimahooda ku xallistaan.[35] Ujeeddada maxkamadaha dhaqanka bulshada ku salaysan loo hirgeliyey waxaa kamid ahaa in :la ogaado xaqiiqada wixii dhacay; in la daddajiyo maxkamadeynta eedaysanayaasha ; la joojiyo dhaqanka isla xisaabtan la'aanta, dib u heshiisiin iyo midnimada la xoojiyo; iyo in la isticmaalo xirfadaha iyo aqoonta bulshada laguna xalliyo khilaafka caddaalad ku salaysan dhaqanka Rwanda.[36]

---

[33] Wareysi hubin sare oo ka tirsan garsoorka, Disembar 2022(Muqdisho)

[34] UN Security Council Resolution 955(1994), 8 Nefembar 1994 oo lagu dhisay Maxkamadda Caalamiga ah Dambiyada ee Rwanda (International Criminal Tribunal for Rwanda), oo xarun looga dhigay Caruusha ee dalka Tanzania. UN Security Council Resolution 2256 (2015) waxaa lagu soo dhaweeyey maxkamaddaas oo shaqadeedii dhamausay si rasmiyana loo xiray 31 Disembar 2015.

[35] Charlotte Clapham, Gacaca: A Successful Experiment in Restorative Justice? E-International Relations, 30 June 2012, https://www.e-ir.info/pdf/24700

[36] Gacaca Courts Achieved their Objectives, New York Times, 11 April 2012, https://www.newtimes.co.rw/article/71125/Opinions/gacaca-courts-achieved-their-objectives ; waxaa kale oo jiray eedaymo loo jeediyey maxkamadahaas, fiiri: Justice Compromised: The Legacy of Rwanda's Community-based Gacaca Courts, Human Rights Watch, 31 May 2011, https://www.hrw.org/report/2011/05/31/justice-compromised/legacy-rwandas-community-based-gacaca-courts

Odayaasha iyo culumada loo soo xulayo in ay kaalinta garsoorayaasha buuxiyaan ,labada qaab oo kor ku xusan midda ay doonto ha noqotee, waa in ay noqdaan dad bulshada kalsooni ka haysta.Dhanka kale, maaddaama dhulalkaas waqti dheer Alshabaab xukumayeen oo ay dadka ka dhaadhicinayeen in garsoorka dowladdu yahay mid dibadda laga keenay oo ka fog diinta islaamka, hirgelinta garsoorka ku-meel gaarka ah oo ay hormuudka ka yihiin odayaasha iyo culummada waxa ay meesha ka saaraysaa doodda gurracan ee Alshabaab. Soomaalida inteeda badan waxay isku raacsan yihiin in dhaqanka xeerku uu hadda u baahan yahay in dib loo habeeyo, gaar ahaan meelaha ay shareecada ka hor imanayso, sidoo kale sida marar badan oo ay ka hor imaanayso xeerarka caalamiga ah ee xuquuqal insaanka oo ay Soomaaliya qaybta ka tahay. Qayb-ka-ahaashaha culumada diinta ayaa arrinkaas wixii aan Shareecada waafaqsanayn meesha ka saaraya. Isla mar ahaantaasna, habka iswaafajinta xeerka Soomaalida iyo Shareecada waxa ay sidoo kale noqon doontaa hab lagu kordhiyo ka-qaybgalka Soomaalida ee nidaamka caddaaladda, kor u qaadidda kalsoonida lagu qabo nidaamka caddaaladda oo garsoorku qayb ka yahay iyo kor u qaadida heerka dareenka lahaanshada ee bulshada.[37]

Deegaannada laga xoreeyey Al-shabaab waa in goobo loo asteeyo in xarumo garsoor noqdaan. Haddii aan deegaanku dhismayaal ku filan lahayn, waxaa kiisaska lagu qaadi karaa geed hoostiis sida caadadu ahayd.
Maxkamadaha kumeel gaarka ah oo laga dhisayo meelaha laga xoreeyey Al-shabaab ama sida guur guurka ku tagaya deegannadaas waa in si kumeel gaar ah looga dhaafaa lacagta ujurada ah maadaama maxkamadaha Al-shabaab ayna qaadi jirin lacag gal furayo ama kharash kale.[38] Haddii lacag laga qaado dadka kiisaska furanaya waxaa imaanaysa in ay dareemaan in maxkamad beenaadyadii Alshabaab fiicnaayeen.

[37] Adre Le Sage, Stateless Justice in Somalia, p.7 (note 1 above)
[38] Waraysi qareen ka tirsan Ururka Qareennada Soomaaliyeed, December 2022 (Muqdisho)

6. CAQABADAHA KU GUDBAN BAAHINTA ADEEGGA GARSOORKA GUUD AHAAN IYO SIDA LOOGA GUDBI KARO

Soomaaliya oo ah dal dagaal sokeeye ka soo baxaya, qaatayna nidaam dowladeed oo cusub oo aan weli si fiican u hirgelin, caqabado badan ayaa ku gudban baahinta adeegga garsoorka. Qaybta hoose waxaan ku falanqeyn doonnaa caqabadaha ku gudban baahinta adeegga garsoorka iyo sida looga gudbi karo.

1. Caqabadda koowaad waa la'aanta heshiis siyaasadeed oo kusaabsan arrimo badan oo ay ka mid yihiin hannaanka garsoorka iyo awood qeybsiga Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada. qodobbo badan oo dastuurka ah oo aan weli lagu heshiin iyo weliba arrimo badan oo ay kamid yihiin hannaanka caddaaladda iyo asluubta dalka, waxa ay u baahan yihiin heshiis siyaasadeed oo ay gaaraan madaxda Dowlad Goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ah. Tallaabada koowaad oo arrinkaas lagu xallin karo waa in la helo heshiis siyaasadeed oo ku saabsan hannaanka garsoorka dalka oo waafaqsan nidaamka Federaalka ah ee dalka dhaqalgalka ka ah. Heshiisyadaas siyaasadeed marka la gaaro in lagu muujiyo dib-u-eegista dastuurka iyo qawaaniinta kale oo garsoorka khuseeya. [39]
2. Sharciyada khuseeya garsoorka iyo caddaaladda guud ahaan waa kuwo la sameeyey xilligii dalka ay ka jirtay dowlad awoodu hal meel ku aruursan tahay. Maadaama hadda nidaam Federaal ah la qaatay, welina aan hay'adaha caddaaladda la federaalayn, si fiican uma kala cadda awoodaha iyo masuuliyadaha hay'adaha heerarka kala duwan ee dowladda, waa caqabad weyn oo taagan.
   Arrinkan waxaa lagu xallin karaa in la sameeyo Guddiga Dib-u-habaynta Qawaaniinta(Law Reforn Commission) loona xilsaaro dib u eegidda qawaaniinta dalka dhammaan oo ay ku jiraan kuwa khuseeya garsoorka iyo ka talo bixinta casriyeynta iyo wax ka baddelka qawaaniinta dalka. In Darsuurka dib-u-eegiddisa lagu caddeeyo awood qaybsaiga Dowladda

[39] Shirkii Golaha Wadatashiga Qaranka oo qabsoomay dhammaadka Disembar 2022 waxaa la gaaray heshiis ku saabsan hannaanka garsoorka laakiin Dowlad Goboleedka Puntland oo keli ah ayaan weli saxiixin. Marka weli ma cadda sida heshiiskaas ku hirgeli doono iyo waqtiga uu qaadan doono.

Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada si meesha looga saaro awood kala jiidashada. Haddii khilaafka labada heer ee Dowladda aan la xallin waa adkaanaysaa in garsoorka la baahiyo.

3. Golaha Adeegga Garsoorka oo loogu talo galay in uu hubiyo madax-bannaanida iyo si wanaagsan u shaqaynta garsoorka oo aan weli la dhisin. Dhismaha golahaan waxa uu ku xiran yahay heshiiska siyaasadeed ee laga gaaro hannaanka garsoorka dalka. Laakiin waa arrin hortabin leh oo ay lagama maarmaan tahay in ay noqoto tallaabada koowaad oo la qaado marka heshiiska siyaasadeed ee hannaanka garsoorka la dhammeystiro.
4. Amiga oo aan sugnayn waa adag tahay in bahda garsoorka si hufan u shaqeeyaan garsoorkana la baahiyo. Waxaa jira deeganno badan oo aan xukunka dowladdu si fiican u gaarin. Waa in amniga guud la sugaa, amniga bahda garsoorkana xil gooni ah la iska saaraa. Tusaale ahaan garsoorkii oo la rabo in ay madax-bannaanaadaan ammaankii xarumihii garsoorka iyo xubnaha garsoorka hay'ado kale hayaan. Waxaa muhiim ah in ciidan boolis oo garsoor la sameeyo oo toos u hoos taga garsoorka kana madax-bannaan hay'adaha fulinta.
5. Dadweynaha oo aan weli kaalin muuqata ku lahayn wada hadallada looga hadlayo mustaqbalka dalka oo ay ku jirto qaab-dhismeedka garsoorka. Taas oo keeni karta in kalsoonida dadweynuhu ku qabaan garsoorka hoos u dhacdo. Waa in dadweynaha ay kaalin ku yeeshaan wadahadallada xalku lagu raadinayo oo laga talo geliyaa. Dadweynaha qaybihiisa kala duwan oo ka qaybqaata wadaxaajoodka talana ku yeesha waxa ay kordhinaysaa kalsoonida dadweynu ku qabaan garsoorka iyo dhammaan hay'adaha dowladda oo ay dareemayaan lahaansho. Haddii bulshadu dareentolahaansho, waxaa sahlanaanaya in garsoorka sahal lagu baahiyo, kalsoonida lagu qabana badato.
6. Garsoorka oo aan lahayn miisaaniyad lagu fulin karo baahinta garsoorka ee loo baahan yahay, madaxbannaani miisaaniyadeedna ayna weli jirin. Waa in miisaaniyadda federaalka ama miisaaniyadaha kale lagu daro baahinta adeegga garsoorka oo la rabo in la gaarsiiyo deegaan kasta oo dalka ka mid ah. Gaar ahaan deegaannada la xoreeyey waa in miisaaniyad ku filan loogu talo galaa.

7. Xukuumadda iyo siyaasiyiinta oo aan weli diyaar u ahayn in la dhiso garsoor madax-bannaan ayna ugu jirin arrimaha hortabinta leh. Taas waxaa qayb weyn ku leh dowladda oo aan dareensanayn muhiimadda garsoorka. Labaatankii sano oo la soo dhaafay waa lagu guuldarreystay in garsoorka la madax-banneeyo, waxaana muuqata in ayna jirin rabitaan siyaasadeed oo arrinkaas ku aaddan. Haddii la dhiso golaha adeegga garsoorka loona madax-banneeyo shaqada loo xilsaaray, garsoorka in uu madax-bannaani iyo la xisaabtan helo ayaa suurtogal noqonaysa.
8. Maalgelin ku filan iyo xirfadlayaal tababbar ku filan haysta oo aan jirin hadda. Waxaa muhiim ah la abuuro xirfadlayaal badan oo garsoorka ka shaqayn kara. Machadka Tababbarka Garsoorka oo la xoojiyo oo bixiya tababbaro garsoorku u baahan yahay.
9. Waxa shaqayn la'aan hay'adaha fulinta ee dowladda dhexdooda iyo wadashaqayn la'aan garsoorka iyo hay'adaha kale oo ay khuseyso. Iyada oo la racayo qawaaniinta dalka waa in hay'adaha dowladda ay ka dhaxayso wada shaqeyn joogto ah, lagana gudbo danaha shaqsiga ah oo laga wada shaqeeyo danaha guud. Haddii wada shaqeyn jiri laheed dadaallada garsoorka ku-meel gaarka ah looga dhisayo ayaa bahda garsoorka si buuxda looga talo gelin lahaa.

6.1 CAQABADAHA GAARKA AH EE GOOBAHA LAGALA WAREEGAY ALSHABAAB IYO SIDA LOOGA GUDBI KARO

Deegaannada lagala wareegay Al-Shabaab iyaga oo gobollada iyo degmooyinka kale ee dalka la wadaaga caqabadaha ku gudban baahinta garsoorka guud ahaan, haddana waxaa deegaannadaas wajahayaan caqado u gaar ah. Qaybtaan waxaan si kooban ugu kor istaagaynaa caqabadahaas gaarka ah. Meelaha laga xoreeyey Alshabaab hadddi adeegga garsoorka la gaarsiiyo, waxaa xal loo helayaa isqabqabsiga, khilaafaadka ka dhexeeya bulshada, dembiyada iyo dadka wax kala tirsanaya. Haddii arrimahaas la xalliyo waxaa la helayaa xasillooni oo qofna uma baahnaanayo in sharciga gacmihiisa ku raadsado ama qabiilka kiciyo. Dagaalka qabiilka ayey ka hortageysaa haddii maxkamadaha la isla tago.[40]

[40] Waraysi xubin sare oo ka tirsan garsoorka, Disembar 2022 (Muqdisho).

Caqabaha deegaannada laga xoreeyey Al-Shabaab ku gudban baahinta adeegga garsoorka waxaa ka mid ah:

1. In waqtiga dheer oo ay Alshabaab xukumayeen deegaannada lagala wareegay ay dadka ku nool warbaahintooda maalin walba xumaanta garsoorka dowladda u soo gudbinaysay. Dadka deegaannadaas ku noolna aamineen in ku dhaqanka shareecada islaamka ay Alshabaab hirgeliyeen oo ayna adkaan doonto in garsoorka dowliga ah horay laga hirgeliyo. Si arrinkaas loo xalliyo, kalsoonida dadkana loo soo dhiso waa in wacyi gelin ballaaran la sameeyaa iyada oo la isticmaalayo dadka waxgaradka ah iyo culumada diinta. Ka qaybgelinta garsoorka odayaasha dhaqanka iyo culumada arrinkaan wax weyn ayey ka qaban kartaa.
2. Caqabadda kale oo deegaanka Al-Shabaab laga xoreeyey ka jirta ayaa ah maadaama Alshabab waqti dheer sheeganayeen in ay shareecada Islaamka fulinayeen, haddii Xeerka Ciqaabta horay laga geeyo waxaa laga yaabaa in aan dadku kalsooni ku qabin maadaama waqti dheer ay fikir qaldan aaminsanaayeen. Sababtaas ayaa maxkamadaha ku-meel gaarka ah oo ay ka qeyb qaadanayaan oday dhaqameedka iyo culumada kaalin weyn in la siiyo loogu baahan yahay.
3. Deegaannada lagala wareegay argagixisada kama jirin wax hay'ado dowladeed ah, waxaa maqan dhammaan hay'adaha caddaaladda sida booliska, xeer-ilaalinta, maxkamadaha iyo xabsiyada. Maqnaashaha hay'adahaas kamid ah silsiladda caddaaladda waxa ay adkaynaysaa arrinka baahinta garsoorka. Waa in deegaan kasta oo la xoreeyo mudnaan la siiyaa gaarsiinta maamulka dowladda qaybihiisa kala duwan. Adeegga garsoorka waa in la siiyaa mudnaanta ay leedahay oo la hirgeliyaa garsoor ku-meel gaar ah sida ugu dhaqsaha badan.
4. Dacwadihii ay qaadeen maxkamaha Al-Shabaab oo dadkii aan ku qancin laga yaabo in ay dacwadaha u keensadaan garsoorka ku-meel gaarka ah oo deegaanka laga hirgeliyey.Arrinkan ayaa keeni karto in kiisas aad u badan yimaadaan oo khuseeya dhowr iyo toban sano. Maxkamadaha ku-meel gaarka ah oo laga hirgelinayo deegannadaas waa in ay qorshaha ku darsadaan kiisaskaas. Odayaasha dhaqanka iyo culumada deegaanka oo bulshadu ku kalsoon tahay ayaa kaalin muhiim ah arrinkaan xalkeeda ka qaadan kara.

5. Waqtiga dheer oo ay Alshabaab deegannada xukumayeen, waxaa la ogyahay in ay qabiilooyinka isku isticmaalayeen. Waxaa laga yaabaa in arrintaas keento in kalsooniga qabiilooyinka ee nidaamka dowliga oo deegannadaas laga hirgalinayo is qabqabsi ka yimaado. Si dadku ugu kalsoonaadaan hay'adaha dowladda oo garsoorku ugu horreeyo Ilaalinta miisaanka qabiilooyinka iyo firqooyinka diinta in ay dhammaan ka muuqadaan garsoorka la magacaabay. Maadaama qabiilooyinka qaar dagaallo iyo kalsooni darro ku dhex jirto in dadka la magacaabaya ahaadaan dad hufan oo bulshada dhexdeeda sumcad ku leh oo dadka dhammaan ku kalsoonaan karaan.
6. Iyada oo arrimaha dhismaha garsoorka iyo baahintiisa khuseeya goobaha la xoreeyey,aan haba yaraatee, laga talo galin bahda garsoorka oo ay ahayd in dadaalladaas hormuud looga dhigo. Maadaama bahda garsoorka ay waayo aragnimo u leeyihiin , ayna tahay shaqadooda waxaa muhiim ah in markasta ay kaalin muhiim ah ku yeeshaan baahinta garsoorka goobaha la xoreeyey iyo hirgelinta maxkamadaha ku-meel gaarka ah iyo qaabka ugu fiican ee lagu hirgelin karo.[41]

7. GUNAANNAD

Qoraalkan waxaa lagu lafo guray baahinta garsoorka iyo kaalinta uu ku leeyahay xasilloonida dalka. Waxaa muuqata in qawaaniinta khuseeysa garsoorka iyo dhammaan hannaanka caddaalada oo dalka dhaqangalka ka ah ay ku salysan yihiin qawaaniintii dowladihii awooduu aruursaneyd garsoorkuna mideysnaa. Maadaama dalka nidaam federaal ah dhaqangal ka yahay weli laguma guulaysan in hay'adaha caddaaladda oo garsoorku ka midka yahay la federaaleeyo ,adeegga garsoorkana dalka oo dhan lagu baahiyo. Garsoorku waxa uu kaalin mug leh ku leeyahay xasilloonida dalka. Haddii garsoor madax-bannaan oo si hufan u shaqeynaya jiro, amarrada ka soo baxana si siman loo dhaqangelinayo, waxa ay abuuri kartaa xasillooni waarta ee dalka.

[41] Waraysi xubin sare oo garsoorka ka tirsan, Dicember 2022(Muqdisho)

Waxaa muuqata in aan baahinta adeegga garsoorka weli lagu guuleysan. Sababaha ugu waaweyn oo guuldarradaas keenay waxaa kamid ah iyada oo aan awoodaha heerarka dowladda kala caddeyn, qawaaniinta agrsoorka oo aan la jaanqaadi karin nidaamka dowlaiga ee dalka dhaqangalka ka ah, golaha adeegga garsoorka oo hubin lahaa hufnaanta iyo madax-bannaanida garsoorka oo aan weli dhisnayn. Hannaanka garsoorka dalka oo aan weli heshiis lagu ahayn iyo siyaasiyiinta oo aan madax-bannayntu muhiimadda koowaad u ahayn waa caqabado kale. Gaarsiinta adeegga garsoorka deegannada laga xoreeyey Alshabaab ayaa iyadana muhiimad gooni ah leh. Maxkamado kumeel gaar ah oo mar mar guur guura in deegaankaas laga hirgeliyo si ay u daboolaan baahida caddaaladda ayaa muhiim ah. Odayaasha dhaqanka iyo culimada in ay qayb weyn ku leeyihiin dhismaha garsoorka kumeel gaarka aad ayey muhiim u tahay. Qaabka loo wajaho caqabadaha ku gudban baahinta garsoorka ayey ku xirnaan doontaa in uu guulaysto isku dayga adeegga garsoorka lagu gaarsiinayo dhammaan dalka.